



**Dhakhaatiirtu waxay ku taliyeen in tallaalada Tdap, MCV iyo HPV ay yihiin habka ugu muhiimsan ee ilmahaaga jira 11 ilaa 18 sanno lagaga badbaadin karo cuduro culus.**

- Tallaalada sabiga ama ilmaha yaryar qaarkood ma jiraan ama shaqeeyaan nolosha oo dhan. Ilmahaaga jira 11 ilaa 18 sanno waxa uu u baahan yahay tallaalo dheeraad ah si uu u sii ahaado mid badbaadsan.
- Tallaalo gaar ah ayaa loo sameeyaa ilmaha da'da roon iyo dadka waaweyn sababta oo ah waxay u badan tahay inay qaadaan cudurada qaarkood. Ilmahaaga jira 11 ilaa 18 lama siin tallaaladan markuu ahaa sabi ama ilmo yar.
- Haddii ilmahaagu caafimaad qabo ama haddii uu si khafiif ah u jirran yahay, tallaaladu waa ammaan waxana ay leeyihiin waxtar.
- Tallaalada Tdap, MCV, iyo HPV kuma jiro jelatiinka doofaarka (porcine gelatin).

**Maanta dhakhtarka ilmahaaga weydii tallaaladan!**

## Tallaaladu waa u bilaash ilmaha jira 11 ilaa 18 sanno.

Waxa laga yaabaa in lacag ah maamulista la qaado laakiin waa lagaa dhaafi karaa haddii aanad awoodin inaad bixisid.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalada:

- La hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisada, ama xarunta caafimaadka
- Waaxda Caafimaadka Dadweynaha — ee Degmada Seattle & King ka wac 206-296-4774

**Muhiim bay u tahay ilmahaaga in loo sameeyo baadhitaan caafimaad sannad kasta!**

Si lagaaga gargaaro inaad heshid dhakhtar, kalkaaliso, ama xarun caafimaad, wac ama booqo:




**Public Health**  
Seattle & King County



Waxa lagu heli karaa qaabab beddel ah Somali  
Reprinted 2013

# Ilmahaaga Jira 11 ilaa 18 Sanno ma ka Badbaadsan Yahay Cuduro Culus?



## Kix (Xiiq-dheer)

Kixdu waxay keentaa qufac jira bilo waxana laga yaabaa inay dhib ka dhigto in wax la cuno, cabo, ama la neefsado

- Kixdu si fudud ayay dadku isugu gudbiyaan marka la qufaco ama la hindhiso.
- Badanaa caruurta da'da roon iyo dadka waaweyn ayaa kixda u gudbiya sabiga ama ilmaha yaryar iyo haweenka uur leh kuwaaso u dhiman kara.
- Kixdu way ka duwan tahay neefta/asma, nuumooniya (pneumonia), iyo cudurada kale ee sambabada.

**Tallaalka Tdap waxa uu ka hortagaa teetanada, gawracatada, iyo kixda.**

- Sababta oo ah tallaalka kixda ee ilmaha yar oo aan waligii jirinayn ama shaqeynayn, waxay dhakhaatiirtu ku taliyeen in tallaalka Tdap la siiyo qof kasta oo da'diisu tahay 11 sanno ama ka weyn.
- **Weydii dhakhtarka macluumaad ku saabsan tallaalka Tdap oo la siiyo adiga iyo ilmahaaga!**



## Cudurka Meningokokal

Cudurka Meningokokal waa caabuuq ama inflekshan culus oo keni kara dhaawac ah maskaxda iyo dhimasho.

- Xiitaa haddii la helo daryeel caafimaad, dhimashadu waxay ku dhici karta gudaha dhawr saacadood ka dib marka la isku arko calaamadaha ugu horeeya.
- Cudurku waxa uu u fidaa qof-ka-qof marka la qufaco, la is dhunkado, ama wax uun lagu wadaago afka, sida dhalooyinka biyaha.
- Qof kasta ayaa uu cudurku ku dhici karaa, laakiin qaangaadhka da'da yar ee xidhiidh soke wada leh, sida marka ay ciyaarayaan isboorti ama marka ay ku wada nool yihiin qollolka la wada seexo ee koleejka, ayaa u badan in cudurkani ku dhaco.

**Tallaalka MCV waxa uu ka hortagaa cudurka meningokokal.**

- Dhakhaatiirtu waxay ku taliyeen 2 qaadasho oo ah MCV in la siiyo caruurta, laga bilaabo da'da 11 sanno.
- **Weydii dhakhtarka macluumaad ku saabsan tallaalka MCV oo la siiyo ilmahaaga!**

## Cudurka “Human Papillomavirus” (HPV)

HPV waa sababta koowaad ee keenta kaansarka afka ilmo-galeenka iyo finanka cawrada.

- Badi dadka uu ku dhacay HPV ma oga inay qabaan, laakiin waxay qaadaan karaan dadka kale marka ay galmo la yeeshaan.
- HPV aad buu caam u yahay ama u badan yahay. Ugu yaraan kala-badh dhammaan ragga iyo haweenka waa uu ku dhici doonta inta ay nool yihiin.

**Tallaalka HPV waxa uu ka hortagaa qaadista cudurka “human papillomavirus” waxana lagaga badbaadaa kaansarka afka ilmo-mareenka.**

- Tallaalka HPV waxa badbaadinta ugu badan laga helaa marka la qaato ka hor bilaabista firfircooniga galmada ama sameynta galmo.
- Dhakhaatiirtu waxay ku taliyeen in saddex qaadasho la siiyo hablaha iyo wiilasha, laga bilaabo da'da 11 sanno.
- **Weydii dhakhtarka macluumaad ku saabsan tallaalka HPV oo la siiyo ilmahaaga!**

